“LAABTA KA SOCO”

Buug il saddexaad ii furay

Caliqeyr M. Nuur
25 Jan 2022

Xog kooban

Bogagga: 151.
Afka: Soomaali.
Madbacadda: Laashin Publishers
Goorta: Nofembar, 2021.
Dalka: Sweden – Katrineholm
ISBN: 978-91-985439-3-3

TUSMO

Arar 3

Kal iyo laab 3

Dheelliga kasha iyo laabta 3

Ka leexo hortooda 4

Caqliga iyo cilmiga..... 5

Tubta qoraaga 7

Dhaliilaha 8

Gunaanud..... 9

Tixraac..... 10

ARAR

Danta qormadani waa in aan aqristayaasha la wadaago sidii uu buuggani iigu maanfuray, gaabiska ku jira iyo weliba in aan muuqaal guud ka siiyo qofka aan weli aqrin.

"Laabta ka soco" waxaa qoray Xuseen M. Cabdulle "Wadaad" oo ah aqoonyahan aad u daneeya af Soomaaliga iyo suugaantiisa. Waa buug baaris qoto dheer ku samaynaya xiriirka ka dhexeeya dhaqanka, suugaanta, nolosha, iyo anshaxa afka, isla markaasna isku deyaya in uu muujiyo sida aragtida ka sokow, eraygu u yahay jaheeyaha dhabta ah ee nolosheenna oo dhan. Wuxuu diiradda saarayaa doorka ay afka iyo suugaantu ku leeyihiin nolosha iyo siyaasadda guud ahaan, wuxuuna keenayaa xalka dhibka ama wixii lagu toosin lahaa dhaliilahaas uu muujiyay.

KAL IYO LAAB

"Laab" oo ah erayga uu buugga oo dhammi ka ambaqaadayo, waxaa inta badan lagu sidkaa "kal" waana laba eray oo kala tilmaamayo arrimo aasaas u ah badbaadada iyo jiritaanka qofka. Salka macnaha labada eray waa kuwa u taagan xubno jirka ka mid ah. Laabta waxaa loola jeedaa saabka feeraha oo iyaga oo laba qalbac ah, sidii wax soo laabmaya uga yimaad lafdhabarta kuna kulma shafka qofka. Laabtaas waxaa ku hoos jira xubnihii uurkujirta, sida beerka oo ay Soomaalidu la xiriiriso dareenno badan iyo wadnaha oo la rumaysan yahay inay ka soo fulaan dareennada jacaylka, nacaybka, naxariista, qiirada iwm. Dad baa doorka wadnaha gaarsiiya heer la yiraa maskaxda labaad ee noolaha.

"Kal" isaguna waa eray loola jeedo ricirrada lafaha taxan ah ee iyaga oo sidii kasha u qotoma ka bilaabma dabajaanta kuna dhammaada lafta madaxa. Waxaa af Soomaaliga lagu yiraa 'xiriir' ama 'lafdhabar'. Kasha meesha ugu sarraysa oo ah madaxa qofka waxaa ku jira maskaxda, inteeda hoose oo dhanna waxaa ku jira dhuuxdheere ama xandulle oo isaguna ah unugyo maskaxeed. Kashaas, siiba qaybta sare ee maskaxda la yiraa waa barta garata xogta ay gudbiyaan dareen-wadayaasha jirka intiisa kale. Balse, sida laabta oo kale, bartani ma xeeriso dareennada naxariista, jacaylka, nacaybka iwm.

DHEELLIGA KASHA IYO LAABTA

Haddii sidaas loo eego, kasha iyo laabtu waa labada meel ee laga helo garasho isu dheellitiran. Waase maxay farriinta qoraaga ee ah in laabta laga socdo? Xuseen-wadaad wuxuu oranayaa *"Macnaha laabta ka soco ma aha hal dhinac ka*

soco, balse naxariis, damqasho, jacayl iyo xisaabtanba waa loo baahan yahay." (b. 138). Xisaabtanka oo kasha ka yimaad iyo naxariista oo laabta ka timaad kolka aan la simin oo ay doc u bataan waa marka aan aragno arrimo si xun loo maammulay, cid awooddii ay wax ku badbaadin kartay wax ku burburisay iyo cid awooddii ay isku difaaci kartay ka ilduuftay laabxaarni darteed. Ma yara inta ay dadkoodii halaageen madax hal dhinac ka socato, sida colaadaha Soomaaliya ka oogan ama sida aafadii beesha Khowsa ee Koofur Afrika.

Dagaal dheer kaddib oo beelweynta Khowsa iskaga caabbinaysay dhulfidsigii Ingiriiska ayay gabar la yiraa Nongqawuse la kulantay ruuxaantii awoowayaasheed. Ruuxaanta dadkaas geeriyooday waxay gabadha ugu bishaareeyeen inay caddaanka soo duulay badda ku darayaan. Balse si gargaarkaas loo helo waxay shardi uga dhigeen in la laayo lo'da oo dhan, dalagga iyo guryahana la wada gubo, maaddaama ay yihiin hanti lagu tacbay gacmo aafaysan. Gadaal ayaa laga ogaan doonaa in waxa gabadha u waxyooday aanay ruuxaan ahayn, balse ay ahaayeen laba gaal oo marayay jiinka webiga Gharha. Kolkii ay farriintii la wadaagtay adeerkeed Mhlakaza oo ahaa ugaaska Khowsa, ayuu isaguna dhab u qaatay. Amar ayuu bixiyay, kaddibna waxaa xigay xasuuqa lo' lagu sheegay 400,000 iyo weliba guryihii iyo beerihii oo la wada gubay (Peires, 1990). Sida gabadhu werisay, ruuxaanta awoowayaasha ayaa buuxin doona weel kasta oo maran, dalag iyo duunyaba. Farriintii ruuxaanta waa la fuliyay balse gargaarkii lama helin, baahidii dhacdayna waxaa u le'day kumanaan qof, welina waxay beeshu la liidataa saboolnimadii laga dhexlay garabdaarkii aan layska hubin. Tan oo kale ayuu qoraagu ku sheegay in laabta (qalbiga) laga socdo iyada oo aan garashada inteeda kale lagu dheellitirin. Xuseen-wadaad, wuxuu oranayaa "waa in mar walba saldhigga loo noqonayo ee xalka dhabta ah, sida isku duubka ah kuu faraya in aad qaadato farriinta ah 'is raaci laabta iyo maskaxda".

KA LEEXO HORTOODA

"Ka leexdo hortooda" oo ka mid ah cutubyada buugga ayuu qoraagu si layaab leh uga hadlayaa anaaniyadda iyo kelitalisnimada. Wuxuu arrinka ku cabbirayaa sida dhallaan aad loogu roonaaday xilligii uu tabarta yaraa, balse markuu xoogaystay bilaabaya inuu u xoog-sheegto ilmihii isaga ka tabarta yaraa. Haddii si kale loo dhigo, waa madax ay dadkoodu gaarsiiyeen meel sare balse ku abaaldhacay oo bilaabay macangagnimo ilaa laga gaaro xilli ay iska hor leexiyaan oo ay dilaan ama u celiyaan meel ka liidata meeshii ay markii hore ka soo qaadeen.

Sumanguru Kanté wuxuu ahaa boqor macangag ah oo bilowga qarnigii 13aad ka talin jiray dalka Maali. Markii uu dadkii kadeeday, ayaa waxaa hortooda ka

leexiyay Sundiata Keita oo ahaa jiis, fadhiid todoba jirkii ku socod bilaabay isla markaana garaadkiisa la dhaliili jiray. Sundiata haddii uu fadhiid ahaa wuxuu noqday boqor u wada taliya Maali, Guinea-Bissau, Gambia, Ivory Coast, Senegal, Niger iyo Mauritania oo uu intaba ka hor leexiyay boqorro iyo madax laabta oo qura ka socon jiray, dadkana ula dhaqmi jiray sidii beer ay iyagu leeyihiin. Intaas oo dal ayuu wadaajiyay magaca Maali, wuxuuna u gogolxaaray hodontooyo la sheego tii ugu ladnayd ee uu dal gaaro. Wuxuu soo saaray oo xilkii ka dhaxlay madax dadkooda u tura sida Mansa Muusa oo lagu sheego qofkii taariikhda aadanaha ugu hodonsanaa uguna deeqsisanaa. Sidaas oo kale, dalkii Maali isagana wuxuu u rogay barwaaqo-sooran aanay jirin meel dunida ka ladnaan badan. Sida uu Xuseen-wadaad maansadiisa ku yiri:

Haddaadan hayaanka
Socdaalka haloosi
Hoggaan noqonaynin
Nimcooyinka hooray
Hoobaan dejinaynin
Ka leexo hortooda.

Markii uu Sumanguru Kanté ku guuldarraysay inuu qarankiisa meel san dejiyo, waxaa dadkii hortooda ka leexiyay Sundiata Keita oo Maalidii yarayd u rogay dalweyne hodon ah. Balse, Soomaalida oo ah kuwa uu qoraagu la hadlayo iyagu waxay weli ku jiraan heerkii ahbinta ee la lahaa “horteenna ka leexo”.

CAQLIGA IYO CILMIGA

“Caqliga iyo cilmiga” isaguna waa cinwaan ka mid cutubyada buugga. Halkan, wuxuu qoraagu oranayaa “cilmigu ma aha mid ay cid walbaa gaari karto guntiisa, balse qofkii dadaala ayaa inyar oo nasiibkiisa ah ka hela.” Cutubkan, qoraagu wuxuu ku fogaanayaa faa’iidada ay ummadaha u leedahay kobcinta aqoonta iyo kaydinteeda. Caqligana wuxuu ku sheegayaa in uu yahay awood maskaxeed oo kulmisa dareennada kasha, laabta iyo aqoontaas la helay. Hubaashuna waa in garashada dheelliga ah, quursiga aqoonta iyo kaydin la’aanteedu ay dalal badan u horseedday dibudhac aan la mahadin.

Muusa al-Kaadim wuxuu ahaa wiilkii Imaam Jacfar al-Saadiq oo ahaa Imaamkii 6aad ee mad-habta Shiicada, isla markaana ahaa caalimkii ay ka aflaxeen afarta Iimaam ee Abu Xaniifa, Maaliki, Axmed ibnu Xambal iyo Shaafici. Waxaa la weriyaa in uu Abu-Xaniifa maalin yimid aqalkii Imaam Jacfar, markaas buu soo hormaray Muusa al-Kaadim oo tukanaya. Muuse markaas waa kuray aan

qaangaarin. Abu-Xaniifa ayaa dareemay in wiilka uu soo hormaray salaad ku jiray, markaas buu hadhow u yeeray oo ku yiri "Waxaan ku barayaa salaadda, ee adiga oo tukanaya haddii uu qof ku hormaro, gacanta iskaga dhig." Muusa al-Kaadim ayaa kolkaas yiri "Abu-Xaniifow, Alle wuxuu ii sheegay inuu iiga dhowyahay halbowlahayga[1], markii aan tukanayeyna Alle ayaan la xiriirayay oo ma arkayn qofka hortayda maraya". Halkaas ayuu Abu-Xaniifa ku garawsaday in wiilka yari uga cilmi badan yahay arrinka uu ka waaninayo. Cilmigii iyo caqligii Imaam Jacfar waxaa sharaystay dowladdii Cabbaasiyiinta oo markii dambe xabsi dhigtay kuna sumeysay. Sidaas oo kale ayuu Muusa-al-Kaadin noqday caalim isaguna caqli badan, balse sidii aabbihiis ayuu ku dambeeyay xabsi ugu dambayntii lagu sumeeyay.

Ilbaxnimadii Islaamka ee adduunku ku soo hiran jiray ayaa eersatay hoos u dhaca awooddii, dhaqaalihii iyo weliba caqligii umadda, kaddib markii aqoontii laga tagay oo nin jeclaysi iyo sadbursi loo kacay, taas oo keentay in caalimkii laga jeclaaday taageere maangaab ah iyo xigaalo danley ah. Kolkii badownimo loo wada xuubsiibtay kaddib ayaa waxaa curtay halkudhegyo, maahmaahyo ama suugaan gurracan oo si dadban u noqotay cilmiga keliya ee jaheeya hab fekerka bulshada iyo arrimaha nolosha oo dhan. Murti ama maahmaah tii lagu sheegaba, halkudhegyadaas ayuu qoraagu aad ugu fogaanayaa sida ay majaraha ugu qabteen garashadii Soomaalida. Tusaale ahaan, mid baa oranaysa *"Weysha gowrac dibigu ha quustee"* oo faraysa in weyshii dhasha iyo caanaha laga filayay la gowraco si dibiga loo cabsi-geliyo. Haddii si kale loo dhigo, dulucdu waa in cid mudnaan weyn leh la dhibaateeyo si loo cabsi-geliyo cid iyada ka mudnaan yar. Waanada qoraaga ee arrinkan ku aaddani waa *"waxaa hagaagsan in weysha gowraca laga dhaafo, dibigina cabsi gelinta iyo argaggaxa laga daayo"* (b. 17).

Mar kale ayaa haddana dibigii la liidayaa oo la oranayaa *"ninkii hurdaa siciis dibi dhalay"* tiiyoo la muujinayo in ninkaas soo jeeday uu weyshii qaatay. Tanina tii hore ayay burinaysaa oo weyshii ayay siinaysaa mudnaan weyn. Dhanka kale waxay dhiirrigelinaysaa dhac iyo xatooyo. Qoraaga oo tii koowaad tixraacaya ayaa oranaya *"saw yaab iyo yaabkii iyo caqli xumo maahan in iyadii la gowraco si cid kale loogu cabsi geliyo?"* (b. 14). Haddana meel kale ayuu qoraagu ku leeyahay "*waxa weysha ku dhacaayo iyo dulmiga lala soo doontay waxa ay ka mid yihiin dhacdooyinka faraha badan ee aan hubsiinada leheyn ee carra-edeg dusheeda ka dhacayo, weliba geeskeenna".* Maahmaahdu waxay si dadban u muujinaysaa in

---

1. (Quraan 50:16): Annagaana ugu dhow halbowlaha dhuunta – وَنَحْنُ أَقْرَبُ إِلَيْهِ مِنْ حَبْلِ الْوَرِيدِ

cid aan gef gelin la ciqaabo si cid kale loo cabsi geliyo, waana fal inta badan ka dhaca madaxda kelitaliska ah oo dad aan dembi gelin ciqaab daran marsiiyo si ay digniin ugu noqoto kuwa kale ee dhiirran kara.

TUBTA QORAAGA

Qorayaal badan ayaa halgan ku jira, si ay wax uun u badbaadiyaan. Qaar baa u halgamaya in ay dadkooda ka saaraan aqoonyarida oo ay waxbaraan, kuwana awoodo dibadda ah ayay qalinkooda uga difaacaan qarankooda, qaarna waxay dagaal kula jiraan dhaqammada xun, u doodista sinnaanta aadanaha ama sababo kale oo anshax iyo turaal la xiriira. Marka ay samaha iyo xumaanta timaadna waa mahuraan in dhinaca san loo leexdo.

Qorayaashii si toosa ama dadban samaanta ugu hiilliyay waxaa ka mid ahaa Chinua Achebe oo ah qoraaga buuggii "Kala-haad" **(THINGS FALL APART)** ee uu ku suugaameeyay gaboodfalkii gumaystaha. Ma ahayn oo keliya sheeko gobannimo-doon, balse wuxuu noqday buug irdaha u furay baraarug ay hal-abuurkii Afrika qalinkooda la cuskadeen. Ngugi Wa Thiong'o oo ahaa qoraaga "Sagaalkii Wanaagsanaa" (The Perfect Nine) oo isaguna sheeko-faneed ku cabbiri jiray kelitalisnimada madaxda Africa balse ugu dambayn arrinkaas ku mutaysay xabsi iyo in dalkiisii Kenya laga cayriyo. Waa qoraa samaantii uu u hedladay ay weli ka dhex ifayo suugaanta Geeska Afrika. Nadine Gordimer, iyaduna waxay ahayd caddaan Koofur Afrikaan ah balse sheekooyinkeedii ugu hiillisay dadka madow, heer ay ku mutaysatay xabsi iyo qoraalladeedii oo la diiday in dalkaas lagu faafiyo. Dhib badan kaddib, saddexda qoraaba billado ayay guddoomeen oo waa loo qiray samihii ay isu xilqaameen.

Qoraa Xuseed-wadaad, sidii Ngugi oo kale ayuu isagu ka dhiidhinayaa dhaqanka taban ee dadkiisa aafeeyay. Waa dhaqanka horseeday colaadda, kala qoqobnaanta iyo dibudhaca ee uu oranayo *"waxa aan dhex dabaalanaynaa darxumo iyo barwaaqo meel wada yaal" (b. 3).* Waxaa jira hab feker uu rabo inay dadkiisu ka xoraabaan, meesha wax laga sixi karana wuxuu u arkaa toosinta anshaxa afka, daliilahana wuxuu intooda badan ka soo qaadanayaa oraahyada iyo maahmaahda caanka ah. Xayndaabkaas dhexdiisa ayuu uga jawaabayaa su'aalo uu is weydiinayo oo ah: Maxaa la isu colaadinayaa? Maxaa nabadda loo diidayaa? Yaa diiddan in nabad la helo? Colaadda la abuuray maxaa laga faa'iidayaa? (b. 71).

Tubta qoraagu waa xumaan reebis iyo samatalis. Se, buugga waxaa ku jira iimo aan badnayn oo intooda badan ka yimid xagga xeerarka qoraalka. Bal aan kormaro afar qodob oo ka mid ah dhaliilahaas.

DHALIILAHA

1. Meelo badan ayuu buuggu jebinayaa xeerkii ahaa in magaca guud lagu bilaabo xaraf yar haddii aanu sadar ku bilaaban ama aanu hakad iyo calaama-su'aal ka dambayn.

   - .. dalkeennu waa **H**odon waana… (b. 3)
   - .. maxaa yeelay **D**alkeennu….. (b. 3)
   - ..u adeegsado **H**alkudheg ahaan.. (b. 44)
   - Ma **X**ukun togan mise…(b.52)
   - .. in la galo **H**alganno badan.. (b. 84)

2. Erayo af qalaad ah oo aan ujeedkooda la sheegin oo weliba bilo la sii geliyay.

   - "Waxay isugu jiraan kuwo cudurradooda ay gaareen cudur kursi oo **(Chronic)** ah ama kuwa **(Acute)** ah ama **(Genetical)** ah.." (b.7)

3. Erayo af Ingiriisi ah oo la raaciyay qodobbo af Soomaali ah.

   - .. oo Ideolo**giyo** iyo… (b.31)
   - Tecknolo**giyo** (b. 87)
   - Super power**ska** (b. 92)

4. Erayo af qalaad ah oo aan la fasirin, adeegsigooduna ku yar yahay xayndaabka af Soomaaliga.

   - .. fikirkii Casru cawlama "Globalization".. (b. 86)
   - Compressed from all sides[2]… (b.92)
   - Laysa caalim illaa fawqahu caalim xataa yantahi ilallaah…. (b.116)

Xuseen-wadaad, ma aha oo qura aqoonyahan balse waa xeeldheere afeed, gaar ahaan Soomaaliga, Ingiriiska iyo Carabiga. Waa nin maanta taagan kaalintii abwaan Xuseen Kaddare iyo raggii aynigiisa ahaa marka loo eego aqoontiisa afeed iyo weliba heerka uu ugu geyfan yahay. Sidaas darteed, gefka qoraalkiisa lagu arko waa uu ka halis badan yahay gefka qoraaga caadiga ah ama da'da yar. Sidaas ha ahaatee, waxaan filayaa in daabacaadda labaad laga hufi doono iimahaas aan xusay iyo kuwa aan ka tegay.

---

2. Tuduc ku jirtay gabaygii "Selves Devided" ee uu lahaa Prof. Cali Jimcaale.

GUNAANUD

“Laabta ka soco” wuxuu ka kooban yahay 19 cutub oo marka laga reebo saddex cutub ay inta kale salka ku hayaan maahmaah, oraah ama halhays caan ah. Mid kastana wuxuu qoraagu la xiriirinayaa saamaynta ay ku leedahay fekerka bulshada iyo doorkeeda dhibaatooyinka ka jira Soomaaliya. Sida aan ka gartay farriimaha buugga, qoraagu ma inkirayo in suugaanta Soomaalidu leedahay kayd badan oo taageera dhaqanka san. Balse sidii hore loo yiri "Kheyr wax kaama dhimo ee shar u toog hay" ayuu na tusayaa qaybo afkeenna ka mid ah oo xoojinaya dhaqanka taban.

Inta badan, diimaha, falsafadaha iyo dhaqanka dadyowyga adduunku mudnaan bay siiyaan raadka uu afku ku leeyahay nolosha aadanaha. Quraanka, wuxuu Alle ku yiri *“Kuwa xaqa rumeeyayow, ka dhawrsada Eebbe, kuna hadla hadal toosan (33:70), Ha idiin wanaajiyo arrinkiinna hana idiin dhaafo gefkiinnee..” (33:71).* Dulucda aayaddu waa in haddii uu warkaagu wanaagsanaado ay noloshaaduna hagaagayso. Maahmaahda, halhaysyada iyo suugaantuna tii ay doonto ha noqotee waa jaheeyaha fekerka bulshada, fekerka bulshaduna waa jaheeyaha horumarka ama dibudhaca nolosha aadanaha. Halkaas waxaa nooga baxaya cabbir ah: waxa bulshooyinka adduunka kala hormariyay waa hadba sida ay garashada iyo afkoodu u kala hagaagsan yihiin. Sidaas darteed, “Laabta ka soco” waa buug dhalinaya baraarug horleh oo faraya in aan eraygeenna wanaajinno si hab fekerkeennu u hagaago, kaddibna arrinkeennu u samaado heer qof ilaa heer qaran.

TIXRAAC

Annarita Puglielli iyo Cabdalla Cumar Mansuur. *QAAMUUSKA AF–SOOMAALIGA. 2012. Roma.*

Caliqeyr M. Nuur (2021). *Baro Boqol Eray; Casharka 8aad*. www.laashin.com. 2018. https://laashin.com/baro-boqol-eray-casharka-8aad-w-q-caliqeyr-m-nuur.

Mary Quingly. *Ancient West African Kingdoms: Ghana, Mali & Songhai*. 2002. Chicago.

Nehemia Levtzion. *Islam in West Africa: Religion, Society and Politics to 1800*. 1994. Hampshire

Xuseen M. Cabdulle "Wadaad". *LAABTA KA SOCO – Dareen iyo Garasho*. 2021. Katrineholm.